

Agabka: qalabka badhanka G-Tube ka muuqa gaaban, saliinge biyo ku jiraan

1. Gacmaha dhaq.
2. Hubi in aad haysato cabbirka badhanka saxda ah. Xaqiiji dhererka French iyo dhererka daloolka caloosha. "French" waxaa loola jeedaa ballaca tuubada. Dhererka daloolka caloosha waa dhererka marinka G-Tube ka.
3. Kahor meeleynta, buufi buufinta badhanka cusub dushiisa adigoo isticmaalaya afka buufinta ee ku taal badhanka g-tube ka. Buuxi ilaa caddadka lagu talinayo adigoo adeegsanayo biyo. Xaqiiji in aysan jirin calaamado muujinaya daadin. aariyo bixi buufinta.
4. Dufan ku jilci daloolka caloosha, ama meesha ku taalo caloosha ee G-Tube ka la geliyo, iyadoo la isticmaalayo – dufanka sida K-Y ama jeelka wax lagu jilciyo (lubricating jelly). Ha u isticmaalin saliid ama faasiliin jilciso ahaan.
5. Aariyo bixi buufinta badhanka la geliyey adigoo gelinayo saliinge afka buufinta laga buuxiyo oo biyaha kasoo dhuuqayo.
6. Si dabacsan kor ugu jiid kana saar aalada daloolka caloosha si tartiib ah oo cadaadis joogto ah.
7. Mari jilciso biyaha ku milanta caaradda aalada. Waxaa laga yaabaa inaad haysato oo uu ku jiro qalabkaada adkeeye cad ama buluug ah (Blue or White stiffener) si aad u geliso G-tube-ka kaagana caawiyo hagida meeleynta.
8. Si dabacsan ugu riix caaradda G-Tube ka daloolka caloosha ilaa bannaanka tuubada si siman u taabto caloosha.
9. Ka saar adkeeyaha (stiffener) haddii la isticmaalay.
10. Buuxi saliinge ilaa caddadka biyaha saxda ah oo ku dhaji afka buufinta laga buuxiyo kuna buufi buufinta ilaa cadadka lagu taliyey.
11. Si dabacsan u jiid G-Tube ka oo fiiri calaamado muujinaya daadin.
12. Ka tirtir wixii dareere ama jilciso ah tuubada iyo daloolka caloosha.
13. Hubi tuubada in si sax ah loo geliyey adigoo ku xidhaya tuubada lagu dheereeyo meesha quudinta. Kadib dabarka ka fur tuubada dheereeynta oo dhageyso hawo iyo/ama ku dhaji saliinge oo gadaal u jiid saliingaha cinjirkiisa si aad u fiiriso waxa caloosha ku jiro sida caanaha ama dheecaanka caloosha.

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.